Isbeddellada Guud ee ugu Muhiimsan

Dagaal xooggan ayaa Muqdisho 23kii Oktoobar ayugu dhinteen dad lagu qiyaasey 30 waxaana ku dhaawacmey 70 kale, oo badidoodu ahaayeen dad rayid ah. Sida ay sheegayaan wararka saxaafadda, dhowr hoobiye oo la sheegey in ay soo rideen kooxaha kacdoonsanayaasha ah ayaa ku dhacay meelo u dhow garoonka Aadan Cadde ee degmada Madiina. Iyaga oo weerarkaa ka jawaabaya, ayaa ciidamada Hawlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) iyagana la sheegey in ay duqeeyeen qaybo ka mid ah Muqdisho, oo ay ka mid yihiin goobo ganacsi iyo goobo la deggan yahay oo ku yaalla degmooyinka Hodan iyo Howl-Wadaag. Dagaalka ayaa ka qarxay waddada Maka Al-Mukarrama ee isku xirta xarunta Madaxtooyada ee Villa Soomaaliya iyo Garoonka Caalamiga ah ee Muqdisho waqtigaa oo kolonyada Madaxweyne Sheekh Shariif ay u socdeen dhinaca garoonka diyaaradaha. Labada dhinac ayaa lagu soo warramey in ay adeegsadeen hub culus. Af-hayeenka AMISOM ee Muqdisho ayaa beeniyey in AMISOM ay duqeysey goobo degaan iyo suuqa Bakaaraha.

Sida ay qabto warbixintii ugu dambeysey (ee la soo saarey 21 Oktoobar) ee Saadaasha Haqab-beelka Cuntada ee Soomaaliya ee ay soo saartey Shabakadda Nidaamka Ka Sii Digista Abaaraha (FEWSNET), ayaa lagu sheegey in xaaladda haqab-beelka cuntada ee hadda ka jirta Soomaaliya aan la fileynin in ay isbeddesho ilaa bisha Maarso 2010ka. Warbixinta ayaa sheegtey in sida ay ugu badan tahay in ay xaaladdu noqoto, la helo roobab caadi ah ama ka badan kuwa caadiga ah bilaha Oktoobar ilaa Disembar, taas oo ay sabab u yahay *El Nino,* ay roobabkaa soo af-jari doonaan abaartii dabadheereyd ayna wanaajin doonaan helidda biyaha iyo baadka. Maaddaama ay kor u kaceen biyaha iyo baadka laga helo badi degaannada daaqa xoolaha ee ugu muhiimsan, waxaa la rajeynayaa in ay si weyn hoos ugu dhacdo kharashaadka ay qoysaska daaqsatada ah ay ku bixiyaan biyaha iyo geeddiga muddada u dhaxaysa bilaha Jannaayo ilaa Maarso 2010. Haseyeeshee, gobollada Bakool, Hiiraan, Galgaduud, Mudug, Nugaal, Sool, Sanaag, iyo Togdheer ayaa aan la fileynin in ay abaartan ka soo kabtaan muddada lixda bilood ah ee soo socota, maaddaama lo'da iyo geelu ay ku qaadaneyso dhowr xilli oo roob caadi ah ay helaan si ay u dhalaan oo caano looga helo. Sidaa daraaddeed, dadweynaha gobolladan ayaa weli ku jiri doona heerar ba'an oo haqab-beel la'aan cunto ah lixda bilood ee soo socda.

WFP ayaa degdeg ugu baahan 215,000 metrik ton oo cunto ah oo lagu qiimeeyey US$ 193 milyan si ay gargaarka cuntada ugu si waddo 3.5 milyan oo Soomaali nugul ah lixda bilood ee soo socda. Baahidan waxaa sal looga dhigey qiyaasta baahiyaha ee dib loogu eegey daraaseyntii ballaarneyd ee ay hey'adaha ka wada qaybqaateen ee ay hoggaamineysey Waaxda Lafagurka Haqab-beelka Cuntada iyo Nafaqeynta ee Soomaaliya. Cunto yaraanta noocan ah waxa ay keeni kartaa in dadka nugul ee Soomaaliyeed ay macluulaan, waxaana kor u kici doona nafaqo-xumada, iyada oo ay dadku u sii jilicsanaan doonaan cudurro waxaana badan kara nisbada dadka dhimanaya. Kalago' ku yimaada gargaarka cuntada bani'aadamnimada ee Soomaaliya ayaa sidoo kale ay u badan tahay in uu dhaliyo dhaqdhaqaaqyo ay dad badan ay xuduudaha kaga gudbayaan. WFP Somalia waxa ay mudnaanta siineysaa in ay wixii qaaraan miisaaniyadeed ee cusub ah oo ay hesho ku gargaarto Dadka Gudaha Ku Barokacay, quudinta hay'adaha, iyo nafaqeynta.

Walter Kaelin, oo ah Wakiilka Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobey u qaabilsan Xuquuqaha Bani'aadamnimada ee Dadka Gudaha Ku Barokacay, ayaa soo afjarey kormeer uu ku mareyey Soomaaliya. Intii uu kormeerkiisa ku jirey (14 ilaa 21 Oktoobar), waxa uu soo booqdey xerada Qaxootiga Dhadhaab ee ku taalla dalka Kenya, halkaas oo uu kula kulmey dad dhowaan ka soo galey Koonfurta/Bartamaha Soomaaliya. Soomaaliya gudaheeda waxaa uu Dadka Gudaha Ku Barokacay kula kulmey Gaalkacyo, Boosaaso, iyo Hargeysa. Waxaa uu sidoo kale la tashi la sameeyey TFG-da, maamullada Somaliland iyo Puntland, waxaana uu la kulmey wakiillo ka socdey hay'adaha bani'aadamnimada iyo bulshada rayidka ah. Mudane Kaelin waxa uu welwel ka muujiyey taageerada kooban ee ay helaan Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Soomaaliya waxaana uu sheegey in "gargaarka bani'aadamnimada ee aan gaari karin kuwa ugu baahida badan, halista soo wajahda shaqaalaha bani'aadamnimada, sida afduubyada, iyo sidoo kale qaaraanka deeqbixiyeyaasha ee sida aadka ah hoos ugu dhacay ay sii xumaynayaan dhibaatooyinka bani'aadamnimada ee muddada dheer soo jirey waxaana ay dad gaarsiin karaan heer aan ilaa hadda la garaneynin". Waxa uu hoosta ka xariiqey in dhammaan qaybaha

ay khuseyso ay hubiyaan gaarsiinta gargaarka bani'aadamnimada, bedqabka shaqaalaha bani'aadamnimada, oo aaney caqabad ku noqon gaarsiinta gargaarka bani'aadamnimada ee degdegga loogu baahan yahay kaas oo markiisii horeba yaraa. Mudane Kaelin waxaa uu ku sii taliyey in, ilaa intii suurtagal ah, hay'adaha bani'aadamnimada ay xafiisyadooda hawlgallada ay ka wareejiyeen Nayroobi oo ay geeyaan Puntland, Somaliland iyo degaannada kale si gobollada ay dhibaatooyinku saameeyeen looga adeegi karo.

Sida ay qabto UNHCR, ilaa 34,000 oo qof ayaa ku barokacay Soomaaliya oo dhan ilaa 1dii Sebtembar 2009ka, 17,000 ka mid ahna Muqdisho ayaa ay ka qaxeen. Qiyaastii 13,500 oo qof ayaa ka tegey Muqdisho oo aadey qaybo kale oo dalka ka tirsan halka 3,400 ay aadeen deegaanno ka ammaan roon oo isla magaalada ah.

Waxqabadka

Dhammaan 16kii xarumood ee cuntada karsan lagu qeybineyey Muqdisho ayaa hadda shaqeeya. Goobtii lix iyo tobnaad "degmada Cabdulcasiis" ayaa dib loo furey toddobaadkan ka dib markii loo wareejiyey meel u dhow xafiiska weyn ee la-hawlgalaha degaanka ee SAACID. Marka laga reebo goobtan ugu dambeysey, dhammaan xarumaha quudinta cuntada karsan waxa ay shaqeynayeen ilaa bishii Luulyo ee la soo dhaafey. WFP ayaa sii waddey in badeecooyinka cuntada qalalan ay gaarsiiso la-hawlgalayaasheeda si ay raashin karsan oo kulul ay u siiyaan Soomaalida jilicsan. Toddobaadkii la soo dhaafey, 16ka xarumood waxa ay soo saareen raashin ku filan 413,437. Korjoogteynta lagu sameeyey barnaamijka ayaa tilmaameysa in qof kasta uu hely saddex qaaddada caadiga ah oo mushaalli ah, oo lala wadaagayo 4.5 qof oo kale oo uu qofkaa ku jiro. Arrintan ayaa dhab ahaan micnaheedu yahay, in qiyaastii cuntada ee loogu talogaley 80,000 oo qof maalin kasta ay dhab ahaantii si buuxda ama qayb ahaan u quudanayaan ilaa 320,917 maalin kasta. Afartan iyo shan boqolkiiba dadka cuntada helaya waa dheddig waxaana jirta in 40% wadarta ka-faa'iideystayaashu ay ahaayeen carruur. Ragga waaweyni waa keliya shan boqolkiiba.

WFP iyo la-hawlgalayaasheedu waxa ay 459 metrik ton oo badeecooyin cunto kala duwan ah u qaybiyeen 43,110 ka-faa'iideystayaal taas oo hoos imaaneysay cunto-qaybinta guud ee gobollada Nugaal, Sool iyo Sanaag ee waqooyiga Soomaaliya. 40,020 ka-faa'iideystayaal kale ah ayaa heley 446 metrik ton oo badeecooyin cunto kala duwan ah taas oo hoos imaneysey cunto-qaybinta guud ee Degmooyinka Jalalaqsi iyo Galhareeri ee gobollada Hiiraan iyo Galgaduud.

UNICEF, oo ay iskaashanayaan NGO-ga degaanka ee SOPHPA, ayaa kor u qaadey waxqabadyada koloriin-ku-daridda ee laga fulinayey goobo ka tirsan magaalada Muqdisho, oo ay ka mid yihiin degaanka Dayniile, degsiimooyinka Dadka Gudaha ku Barokacay ee Kax-Shiiqaal, iyo Waddada Afgooye. Qiyaasta koloriinta ayaa kor loogu qaadey heer sarreeya oo la oggol-yahay, si loo qaado tallaabooyinka ugu adag ee looga hortegayo shuban biyoodka ba'an. SOPHPA ayaa adeegsaneysa shaqaalaheeda 'koloriinta ku darayaasha ah' si ay ula socoto ayna koloriin ugu darto ceelasha iyada oo ay taas barbar socoto koloriin ku daraddi joogtada ah ee ay sameeyaan milkiilayaasha iyo kuwa wada hawlaha ceelasha.

UNICEF iyo la-hawlgalyaasheeda ayaa sii wada wax ka qabashada biyo yaraanta Soomaaliya. In ka badan 7,000 oo qof oo ku nool degmooyinka Warsheekh iyo Cadale, ee gobolka Shabeellaha Dhexe, ayaa helaya biyo ammaan ah oo la cabbo ka dib markii la dhisey toban ceel oo cusub oo lana dayactirey 15 ceel oo hore u jirey. Tababar ku saabsan sida looga shaqeysiiyo oo loo dayactiro bamamka tamarta qorraxda ku shaqeeya oo ku xiran toban nidaam-biyood oo qorraxda ku shaqeeya ayaa ay ka-faa'iideysanayaan 10,000 oo qof.

Muddada warbixintan, ayaa UNICEF iyo la-hawlgalayaasheedu ay *plumpy'doz* 13,068 oo carruur ah ugu qaybiyeen degmooyinka Lughaye, Boorama iyo Berbera ee Somaliland, iyo 9,743 Carruurta Dadka Gudaha Ku Barokacay ee Boosaaso. *Plumpy'doz* ayaa ah cunto nafaqo badan oo 'u diyaarsan in la cuno' oo wax ka tarta ka hortagga nafaqo-xumada ba'an. Qaybinta *Plumpy'doz* ayaa ka bilaabaneysa Koonfurta/Bartamaha Soomaaliya bisha Nofembar taas oo lagu beegsanayo 108,000 oo ah carruurta ugu nugul ah.

La soo xiriir:

Faahfaahinta dheeriga ah ee afka Ingiriisiga, kala soo xiriir: Rita Maingi +254 734 800 120 – maingir@un.org. Af-Soomaaliga ama Ingiriisiga, kala soo xiriir Muna Maxamed + 254 733 643 737 – mohamed26@un.org

UNOCHA Somalia, Ngecha Rd. (off Lower Kabete Rd). P.O Box 28832, 00200, Nairobi, Kenya.
Tel: +254 20 4002400, Website: http://ochaonline.un.org/Somalia